



የኢትዮጵያ ፌዴራላዊ ዲሞክራሲያዊ ሪፐብሊክ ኤምባሲ
ለንደን
Embassy of the Federal Democratic Republic of Ethiopia
LONDON

22 February 2012

**MARTIQAAD KA QEYBGAL MAALINTA IIBSIGA BOONDHIGA
BIYO XIDHEENKA WEYN EE DIB U CURASHADA WEBIGA NIIL.**


Waxay Safaaradda Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Federaalka Itoobiya (JDFI) ee Boqortooyada Ingriiska iyo Golaha Jaaliyadda Soomaalida Itoobiya ee UK si wadajir ah iddiinku martiqaadayaan dhammaan shacabka Soomaaliyeed ee ka soo jeeda Dawladda Deegaanka Soomaalida (DDS) iyo shacabka Soomaaliyeed ee walaalaha ah ee ka soo jeeda dawladaha dariska ah ee ku nool boqortooyada Ingriiska inaad kasoo qeybgashaan munaasabadda iibsiga boondhiga Biyo-xidheenka weyn ee Dib u Curashada Webiga Niil.

Waxaa dhammaan shacuubtaas sharafta leh la socodsiinaynaa in maalintaas oo ay u heli doonaan fursad qaali ah oo ay ku iibsadaan saamiyada boondhiga uu goobta iibsiga boondhiga uu Marti Sharaf noogu noqon doono wafdi uu hoggaaminayo Madaxweynaha Dawladda Deegaanka Soomaalida Mudane Cabdi Maxamuud Cumar oo soo gaadhaya UK si uu bulshada ugu dhiirigaliyo inay ka faa'ideystaan fursadda iibsiga boondhiga.

Sidaas darteed waxay mar labaad Safaarada JDFI iyo Golaha Jaaliyadda Soomaalida Itoobiya (GJSI) ee UK idinku martiqaadayaan inaad barnaamijkaas si ballaadhan aad uga soo qeyb gashaan si aad ugu reebtaan raad taariikhi ah jiilka soo socda.

Saamiyada boondhiga ee la iibsan doono waa kuwo qiimahoodu yahay 50,100, 300, 500 iyo 1000 Pound Sterling (lacagta Ingriiska). Fadlan hore u soo qaado hal sawir oo yar.

MAALINTA: AXADDA MARCH 4, 2012
SAACADDA : 1:00PM
GOOBTA: SAFAARADDA ITOOBIYA
17 PRINCES GATE
SW7 1PZ
LONDON, UK



17 PRINCES GATE
LONDON SW7 1PZ
www.ethioembassy.org.uk

TEL: 0207 589 7212
FAX: 0207 584 7054
e-mail: info@ethioembassy.org.uk